



## Guadalupe Guerrero

Guadalupe Guerrero wuxuu yahay ilaa iyo bishii Oktoober sanadkii 2017 Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland, kaasi oo ah iskuulada degmada ugu weyn Oregon.

Guerrero wuxuu ku soo kordhiyey waayo-aragnimadiisa hoggaamiyeniimo ee uu u lahaa sida loo maamulo iskuulada ku yaala magaaloyinka gudahooda, isaga oo muddo 10 sanno ah ka soo shaqeyey Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo sidoo kale muddo toban sano kalena Dugsiyada Degmada La Mideeyey ee San Francisco.



Magaalada San Francisco, wuxuu ka soo noqday Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada ee dhinaca Duruusta, Hal Abuurka iyo Cadaalada Bulshada muddo dhan shan sano. Marka aad eegto mas'uuliyadiisii waxaa ka mid ahaa inuu kormeero iskuulo tiradoodu dhan tahay 129 iskuul oo ku yaala degmada, waxbarashada xilliga hore, manhajka iyo duruusta, addeegyada gargaarka ardayda, waxbarashada ardayda baahiyaha gaarka ah leh, iyo kooxda hal abuurka ee degmada.

Ka hor intii aanu doorkani ky soo shaqeyn, wuxuu soo noqday Ku-Xigaha Guddoomiyaha Waxbarashada Soonaha Guddoomiyaha, isaga oo mas'uul ka ahaa sidii isbedel wax ku ool ah loogu sameyn lahaa iskuulada bulshada aan helin addeegyadii ay u baahnaayeen inay helaan ee magaalada.

Markii uu Boston ka shaqeynayey waxaa loo xil saaray iskuulada degmada ee inta badan heerkoodu waxbarashadu uu aadka u hooseeyey, iyada oo la siiyey inuu isbedel ku sameeyo waayo-aragnimada iskuul ay in ka badan 500 arday oo taariikh ahaan ahaa ardayda aan helin addeegyadii ay u baahnaayeen ee waxbarasho. Hal sano ka dib, isla markiiba wuxuu magacaabay hogaamiye kooxeed u sahlo barashada xirfadaha loo qoondeeyey taageerida maamulayaasha iskuulka iyo inay siiyaan maamulayaasha jawaabcelin qorsheyayaasha horumarinta degmada iyaga oo ka mid ah xubnaha golaha guddoomiyaha waxbarashada.

Ka hor intii aanu bilaabin xirfadiisa maamul, Guerrero wuxuu lahaa waayo-aragnimo dhinaca macallimada oo heerarka fasalada kala gedisan ee waxbarashada iskuulada Oakland, San Francisco, iyo Dugsiyada Dadweynaha Boston, oo ay ka mid ahaayeen inuu wax ku bari jiray luqada Isbaanishka, takhasuska akhriska iyo qoraalka dugsiyada hoose, iyo waliba xisaabta iyo sayniska dugsiya dhexe ee doorka macalinka.

Sanadkii 2001, Guerrero waxaa abbaalmarin loo siiyey aqoonsi ah inuu noqdo macalinka magaalada Boston ugu hoggaamin fiicnaa iyo iyada isla markaana shahaadadii koowaad ee heerka labaad ka qaatay Jaamacada Harvard Iskuulkeeda Barnaamijka Dhinaca Waxbarashada sanadkii 2002.

Guerrero wuxuu ku noqday Jaamacadii Harvard isaga oo dhammeeyey shahaadadii labaad ee heerka labaad sanadkii 2009 isaga oo ahaa ardayda shahaadada labaad ee si gaarka ah loogu doortay Guddoomiyaasha Barnaamijka Iskuulada ku yaala magaaloyinka.

Waxa uu shahaadada koowaad ku haystaa Taariikhda isaga oo ka qaatay Jaamacada California, Los Angeles, wuxuu kale oo uu bartay waxbarashada muusikada iyo isaga Jaamacada UCLA qeybteeda Farshaxanka ku bartay Violin.

Guerrero wuxuu dhawaan u dabaaldegayaa sanadkii 20 naad ee ay xaaskiisa Carolyn is ay qabeen, iyada oo xaaskiisu tahay macalin dugsi hoose wax ka soo dhigaysay muddo dheer; waxa ay leeyihiin wiil iyo gabadh dhawaan ka qalin-jabiyey dugsiyada sarre.

Isaga oo ah qof aad u aaminsan shaqaalenimada dawlada kaasi oo gaaray heerka Eagle Scout, kuna barbaaray inuu ka mid ahaa ardayda luqada Ingiriisku u ahayd luqadoodii labaad, iyo isaga oo bartay muusikada, Guerrero wuxuu u doodaa arrimaha khuseeya deegaanka, xuquuqda dadka soo galaystida ah iyo isaga oo horseed ka ah waxbarashada farshaxanka.